

Awaaltiris



Maxamed Ibraahim Warsame “Hadraawi”

Tixdan

Tixdan ‘awaaltiris’ waxaa tiriay abwaan Maxamed Ibraahim Warsame “Hadraawi”, waxay soo baxday 13/9/2009; waxayna ku saabsan tahay dayacaadda iyo dhibaatada ka dhalatay ragga balwadda qaadku dilootay ee ‘ka indhabeeley’ xilkii saarnaa.

Sheekada ‘Ugaaso’ waa fadeexad naxdin leh. Waa aabbo ku jira ‘iilka qaadka’, dayacay masuuliyaddiisii, hooyadii qoyska ay dantu badday inay masruufkii dusha u ridato; waxayna ka badin wayday inay bacadka iyo qorraxda ‘qaad’ ku iibiso! Odaygii oo dhowr maalmood reerka ka maqnaa ayaa soo galay aqalkii oo la buuxo. Maba waraysan waxa dhacaye, qaad uu sitay ayuu doonay inuu u fadhiisto! Wuxuu u yeedhay inantiisii si ay ugu adeegto ‘Ugaasooy... Ugaasooy’!!! Waa inan dhowr maalmood ka hor geeriyootay, tacsideediina loo fadhiyo!!! Yaab, amakaag!!!

Abwaanku, waxaa kale oo uu tilmaamaya dhibaatada ku habsata bulshada, marka waayeelkeedu ‘la ambado xilkiisa’ ama si gurracan uu u fahmo ‘siyaasadda iyo maaratinta danta guud’.

Abwaan Hadraawi, wuxuu caan ku yahay inuu sheekooyinka ka curiyo maansooyin xambaarsan duluc qotodheer iyo farshaxannimo huwan.

Tixdani waxay ka kooban tahay (255) meeris, oo dhowr qaybood ah.

1. Uub baad ku jirtaa qarsoone¹
2. Ka soo baxa iilka qaadka
3. Adduunka ragoow mar kaalay
4. Abuurtiyo heegga daawo
5. Awoodaha saaran daawo
6. Falaadkiyo alabbadeeda
7. Ilaal samihiisa daawo
8. Udbaha iyo teedka daawo
9. Aloolka ku jeeran daawo
10. Hagoogta aslaysa daawo
11. Cadceedda ifaysa daawo
12. Ilwaadkiyo nuurka daawo
13. Abaabul-caddaanta daawo
14. Ummuuraha toosay daawo.
15. Dayaxa ishin-buuxsankiisa
16. Aashaa socodkiisa daawo
17. Cirjiidhiyo ololka daawo
18. Rugaa Afagaalladeeda
19. Laxaa iyo Ururka daawo
20. Aleelaha guudka daawo
21. Habeenka amuuman daawo
22. Shareerkiyo aqalladiisa
23. Haddana ashqaraarradiisa
24. Ardaayada gogosha taalla
25. Ummuuraha seexday daawo.
26. Haddaanu arbeebigeedu
27. Ku barin abtirsiimadeeda
28. Inbiig ku dhex joogi maysid.

29. Ugaas bokhran baad ahayde²
30. Irdaha noloshaad ahayde

31. Ilayska dhulkaad ahayde
32. Ragoow indhobeelistaada
33. Asaayo maxaa ka beermay!
34. Halkaad ku lahayd astaanta
35. Maxaa umal soo fadhiistay
36. Maxaa gudcur soo af yeeshay
37. Naftaada markaad illowday
38. Bal soo tiri aafadaada
39. Wixii lumay aynabkaaga
40. Bal daawo inkaarahaaga!
41. Unuunka dhirtaad ka goysay
42. Aahdeeda bal soo dhegayso
43. Hashii iyo awrka geela
44. Abaaludda loo dareershay
45. Ureenkiyo tiinka daawo
46. Rasaasta alwaysa daawo
47. Oomaarkiyo dhiigga daawo
48. Areerinka meydka daawo
49. Islaan curadkeeda weyday
50. Asayda la saaray daawo;
51. Habliyo ubixii dalkeenna
52. Markay Ingiriis u xiistay
53. Markii Iglan looga yeedhay
54. Wedkay ku aroortay daawo;
55. Uneexada gabanka xoortay
56. Abaydinka dooxa yaalla
57. Abkiisa la sheegi waayay
58. Aboodiga boobay daawo;
59. Addoonka addoonka maagay
60. Ku yidhi isku Aadan miihin

61. Gabooye agtiisa yaalla
62. Walaalnimadii ka ootay
63. Aayaadkiyo diinta qeexan
64. Sidaa kaga aayo beelay
65. Halkuu illin mooday daawo;
66. Cirkiyo onkodkiyo hillaca
67. Daruuraha alabaskooda
68. Cuslayn jiray alalagtiiisa
69. Bal daawada uumigiisa;
70. Dhulkii ubixiyo caleenta
71. Ugbaadkiyo doogga laaca
72. Ilwaadkiyo nuurka sheegtay
73. Awaaraha jiifa daawo;
74. Basaastiyo oonka daawo
75. Geyiga umaltoobankiisa
76. Ayaayurantiisa daawo
77. Bal dhawr laba-eefiddaadu
78. Waxay af-dhabaandhab keentay!
79. Garaadka abloobay daawo
80. Adduunyadu baadi maaha
81. Mudkeediyo bulad ammaanka
82. Afkii cunay quusan waaye
83. Hadduu laba-aabudh saaray
84. Hadduu ugubkeeda leefay
85. Muxuu ka dhex joogi uuska?!

86. Ugaasadu meeday heedhe?!³
87. Dorraato miyaan la aasin?
88. Miyaan kafan loo amaahan?
89. Miyaan axan loo yaboojin?
90. Markii araggaa la waayay?

91. Miyaan jinku qaylo oogsan?
92. Miyaan insigii gadoodin?
93. Miyaan ollogeenu yaabin?!

94. Ishaaro san kaama hayno
95. Shidaad naga oolin maysid
96. Ogaal nagu caymin maysid
97. Itaal nagu xoojin maysid
98. Qudhaanjo afuufi maysid
99. Dalool naga awdi maysid
100. Xashiish nala ururin maysid
101. Aqool nala seesi maysid
102. Aqoon nagu biirin maysid
103. Xilkaagana oofin maysid
104. Afkaagana dhawri maysid
105. Sidii gabadhii Ayaan
106. Ayaan-Hooday dhahaane⁴
107. Abwaannimo sheegan maysid
108. Aroor qudha toosi maysid
109. Dhiggaagiyo aynigaaga
110. Adduunka la qaybsan maysid
111. Iskaaba xusuusan maysid
112. Wixii Rabbi kuu abuuray!

113. Intaydu ku deeqi mayso
114. Intaada ku biirin maysid
115. Hantida arladoo dhan taalla
116. Haddaad irbad nooga keento
117. Ducaa ku asqayn lahayde
118. Inkaar naga waayi maysid.

119. Ufiyo bacad baan fadhiistay
120. Anfaaciga aad cunayso
121. Ilaaqda raggaan ku keenay
122. Wuxaan u adkaystay maagis
123. Amaah iyo qaylo joogta
124. Uurkayga waxaan ku haysto
125. Afkayga ka sheegi maayo
126. Asluubtana qoomi maayo
127. Awaashiyo waayahayga
128. Ka daalaco oogadayda!

129. Haddaad na ilaalin weydo
130. Aksaanta ku laaban weydo
131. Abaal nagu yeelan maysid
132. Ammaan naga dhowri maysid
133. Anigu kugu faani maayo
134. Dharaar kugu aarsan maayo
135. Adiga kuu uunsan maayo
136. Agtaydana jiifi maysid
137. Haddaan beri kuu ilduufay
138. Haddeer ku abaysan maayo.

139. Markay ajashaada gaadho
140. Cidina kuu ooyi mayso
141. Ilaahey ka dhuuman maysid
142. Jannada ku aroori maysid
143. Cadaabta ka ooli maysid
144. Godkaaguna waa aboor
145. Abeesiyo waa ciqaab.

146. Ragoow amarkaaga weyni⁵
147. Haweenka uleeya maaha
148. Dhibtooda ku iida maaha
149. Ufaan-uf qadhiidha maaha
150. Albaabbada kheyrku seegay
151. Caqaar ku aroosta maaha
152. Asaasaq ku gaadha maaha
153. Ku aakhiro seega maaha.

154. Ragoow irdho qaadan maysid
155. Ugaadhsi ka seexan maysid
156. Abeerka badbaadin maysid
157. Ugaybkana dhaafi maysid
158. Haddaad cunto aayahaaga
159. Xulkooda haddaad abbaarto
160. Unuunka haddaad ka goyso
161. Areebo sidaad ka yeeli?
162. Sabeen inanteennu maaha
163. Adeeri ka sii mug weyne
164. Asoolkha hablaha ka daaya!

165. Abaartiyo roobka dhoofay
166. In waalan, intiinna dhoohan
167. In qaawan, intii sawaabani
168. Dhammaan ifafaalayaasha
169. Ka muuqda adduunyadeenna
170. Ragoow ubadkaaga leexday
171. Islaamnimadii ka baydhay
172. Agoonnimadooda buuxda

173. Dhashiinna ku aabbo weyday
174. Asmay ku calool galeene
175. Ammaanada boodhka taalla
176. Ragoow ololaynta jaadka
177. Haddaad kaga ood fogaatay
178. Maxaa arrin kuu dambeeya!

179. Ragoow ka adkoow xilkaaga
180. La saayira ooryihiinna
181. Irmaanta xaqeeda siiya
182. Ragoow ubadkaaga toosi
183. Wixii arrin kaa daboolan
184. Iimaanka ku baadi doona
185. Afeefna ka yeesha xaajo
186. Ilashada baylahdiinna;

187. Alhuumadu way fiddaaye⁶
188. Haddaad ummad liil ka weydo
189. Hadday ahab yeelan weydo
190. Waayeelku hadduu abguuro
191. Hadduu odaygeedu waasho
192. Hadduu la anbado xilkiisa
193. Hadduu runta aamusiiyo
194. Hadduu kolba eed xanbaarto
195. Asuulkiyo xeerka soohan
196. Hadduu marba oof daloosho
197. Hadduu laba-eef caddaysto
198. Iimaanka hadduu xaraasho
199. Hadduu wacadkiisa iibsho
200. Araadi ku baadi doono

201. Ilaahey ka yaabi waayo
202. Hadduu kolba iin caddaysto
203. Hadduu umal saaqa yeesho
204. Sidii abris qooqan guuxo
205. Hadduu sida awr xunbeeyo
206. Hadduu abur xoor leh saydho
207. Hadduu ilko jiira yeesho
208. Hadduu noqdo aadun huursan
209. Abeesada meel la daaqo
210. Aqoonta qofkii ku dhaama
211. Hadduu asaraar ku beensho
212. Dhirtuba kala ayni weeye
213. Hadduu garanwaa abuuro
214. Hadduu kala geeyo uunka
215. Hadduu marba qayb la ooyo
216. Hadduu marba iil banneeyo
217. Hadduu yahay uur-ka-gaal
218. Wanaagga ku aabi badan;

219. Aleelo hadduu ku waasho
220. Islaan iyo foox karaarsan
221. Agtooda hadduu fadhiisto
222. Ijaabo ka baadi-doono
223. Iblayska hadduu la showro
224. Hadduu marba ood ka boodo
225. Ishaaro xun baa qarsoon.

226. Haddaanay astaan lahayn⁷
227. Abbaar iyo nuxur lahayn
228. Aroor iyo raad lahayn

229. Ammaan iyo qawl lahayn
230. Asluub iyo dhaqan lahayn
231. Islaamnimo sheeganayn
232. Hadday wada eexo tahay
233. Hadday asaroorin tahay
234. Asaasiran lagu bursado
235. Hadday dabin aasan tahay
236. Hadday wada eeso tahay
237. Shil iyo wada aano tahay
238. Hadday agaraadam tahay
239. Addoonsigu diin u yahay
240. Hadday orgobaysan tahay
241. Iimaanku ka qooman yahay
242. Hadday Arraweelo tahay
243. Hadday Abnawaase tahay
244. Afduub iyo beeno tahay
245. Axsantu ka maydhan tahay
246. Hadday orgi iyo ri' tahay
247. Or iyo wada qaylo tahay
248. Hadday adhiyysi tahay
249. Hadday adhaxtuujin tahay
250. Ilduuf iyo jeeble tahay
251. Hadday wada '*aniga*' tahay
252. Siyaasadiaabbe ma leh.
253. Ku daalka abaabulkeeda
254. Alooskiyo baanaheeda
255. Ujeeddo ka keeni maysid!!!⁸

Tilmaamo

- ¹ Qaybtan, meerisyada 1-28, abwaanku wuxuu ragga qaadku dilooday kula talinayaan inay ka soo baxaan ‘iilka qaadka’ oo bal adduunyada quruxdeeda iyo falsamida Ilaahey –sw- u sameeyay daawadaan, waxna ku qaataan.
- ² Qaybtan, meerisyada 29-85, wuxuu abwaanku ku sheegayaa dhibaatada iyo burburka ku habsaday nolosha iyo bulshada markii ay raggu kaalintoodii gabeen, halkay wax ka tari lahaayeenna ay waxyeellada ka qayb qaateen.
- ³ Qaybtan, meerisyada 86-145, waa ‘fadeexaddii Ugaaso’; oo iyadoo dhowr maalmood ka hor geeriyyotay, maradii kafankana amaah loogu soo qaaday. Aabbeheed, oo magaalada dhinac ka joogay, kana war la` yahay geerideeda; ayaa u yeedhayaa si ay ugu adeegto. Hooyadii reerka oo intii hore iska adkaysan jirtay ayaa afka furatay! Iyadoon xishhoodka qoomin ayay inala wadaagaysaa dareenka iyo waayo-aragnimada uu ku reebay aabbahan kaalintiisu bannaanaatay.
- ⁴ Waa Hoodo Suldaan Aadan Faarax (Hoodo-Ayaan), waa halabuur da` yar, una firfircooni arrimaha bulshada. Waxay tirisay maanso ay kaga hadlayso qiimaha ‘hooyada’. Abaalmarin darteed ayuu Hadraawi ugu xusay maansadan, magaceediina ugu lammaaneeyay ‘Ayaan’. Laga bilaabo 2009, waxay caan ku noqotay Hoodo-Ayaan.
- ⁵ Qaybtan, meerisyada 146-186, abwaanku wuxuu ragga ku waaninayaan inay gartaan xilka qoyska ka saaran, waajibkoodana ka soo dhalaalaan.
- ⁶ Qaybtan, meerisyada 187-255, waxay ka hadlayaan masuuliyadda guud ee bulshadu ragga ka sugayso; hadduu xilkaa la ambadana wixii la suaaba waa waxyeello iyo wax aan lagu farxin.
- ⁷ Siyaasaddu waa in danta guud laga shaqeeyo; waxaase abuurmay faham gurracan oo loo qaatay in ‘siyaasaddu’ tahay khiyaamo, hagardaamo, shirqool, danaysi gaar ah... iyo wax kasta oo ka madhan wanaagga iyo qiyamka fiican. Meerisyadan ugu dambeeyaa 226-255, abwaanku wuxuu hoosta ka xarriiqayaa in ‘siyaasaddaas gurracan’ aan cidina meel ku gaadhayn.
- ⁸ Raggaa kaalintoodii dayacay, falaadxumo kalena ku darsaday, waxaa kale oo uu Hadraawi ku falanqeeyay maansoojin dhowr ah, waxaana ka mid ah maansada ‘Rag Siyaasi wada Noqoy’ ee uu tiriay 14/3/1998.

About This Journal

Somali Studies: A peer-reviewed academic journal for Somali studies is a broad scope multidisciplinary academic journal devoted to Somali studies; published annually by the Institute for Somali Studies in print and online forms. **Somali Studies** aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities around the globe.

Somali Studies provides a forum for publication of academic articles in broad scope of areas and disciplines in Somali studies, particularly focused on the humanities and social science. **Somali Studies** appreciates papers exploring the historical background or navigating the contemporary issues; special consideration will be given to issues which are critical to the recovery and rebuilding of Somalia, a country emerging from a devastating civil war.

Institute for Somali Studies (ISOS) is a research centre within Mogadishu University. The Institute aims at knowledge generation through research and analysis on Somalia, Horn of Africa, and the Somali communities in abroad. The institute conducts and coordinates researches, workshops, conferences, discussions and dialogues; and disseminates findings, reports, and analysis through publications and events.

Somali Studies is open access journal and all articles are freely available to read, print and download from the website of the Institute.

Disclaimer: All views and opinions expressed in the article(s) published in **Somali Studies** journal are the sole responsibility of author(s) of the article(s). It does not necessarily reflect those of the editors, the Journal, nor the Institute for Somali Studies.

Copyright© 2017 by Institute for Somali Studies
All rights reserved

Published by Institute for Somali Studies

Website: www.isos.so - Email: isos@mu.edu.so
Tel/Fax: +252 1 858118
Mogadishu, Somalia

Printed in Somalia